

Tix: GSH/21/15
Kalfadhiga: 6aad
Kulankiisa 23aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

27^{ka} Luulyo 2015



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA
KU SAABSAN

DIB-U-EEGISTA DASTUURKA

Mogadishu, 27^{ka} Luulyo 2015

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Abdisalan" or a similar name.

GOLAHA SHACABKA:

- Markuu Arkey:** Qodobada 133, 134, 136 iyo 138 ee Dastuurka Federaalka sida KMG loo ansixiyey;
- Markuu Arkey:** Qodobka 3 (3) ee Dastuurka Federaalka sida KMG loo ansixiyey;
- Markuu Arkey:** Sharcigii lagu dhisay Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;
- Markuu Arkey:** Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka uu dhexdiisa guddi ahaan dhammeystiray akhrinta 1aad uu ugu kuurgalay cutubada Dastuurka;
- Markuu Dhegeystay:** Soojeedinta Guddoomiyaha Golaha Shacabka ku taariikhaysan 21^{ka} Luulyo 2015 kuna saabsan Tabta ugu haboon in loo wajahi karo dib-u-eegista Dastuurka ayadoo la qaddarinayo muddada kooban oo Madasha 9aad ee Golaha Shacabka u harsan;
- Asaga oo ku kulansan:** Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa 23aad ee 27^{ka} Luulyo 2015 ay goobjoog ahaayeen 140 Xildhibaan waxay natijada codeynnta noqotay 138 Oggol, 0 Diiday iyo 2 ka aamustay.

Wuxuu Soo jeedinaya Qaraarka Soo Socda:

1. In Guddiga La-Socodka Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee Golaha Shacabka asagoo si joogta ah ula shaqeenaya lana tashanaya Wasaaradda Dastuurka iyo Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka uu soo diyaariyo tabta loo wajahayo iyo sida loo kala hormarinayo Qodobada u baahan dib-u-eegis farsamadeed iyo kuwo Siyaasadeed iyadoo loo soo kala heereynaayo sidan hoos ku qoran:
 - a. Qodobbada u baahan in lagu sameeyo dib-u-eegis farsamadeed oo keliya oo aan u baahneyn in laga galo wadahadal ama gorgortan siyaasadeed;

- b. Qodobbada ku jira Dastuurka oo u baahan kabit ama kuwo ka maqan oo loo baahan yahay in lagu kordhiyo Dastuurka;
- c. Qodobbada u baahan in dib-u-eegistooda laga yeesho wadahadal si looga gaaro heshiis siyaasadeed oo suurtogeliya dhammeystirka dib-u-eegista Dastuurka Madashan gudaheed;
- d. Ayadoo aynu qaddarineyno waqtiga kooban oo aan heysano, in dib loogu dhigo Madashada Baarlamaanka 10aad ee xiga haddii ay jiraan Qodobbo xallintooda u baahan wadahadal siyaasadeed qaadanaya muddo dheer; iyo
- e. In la dhaqangeliyo Qod.1aad ee Heshiiskii Garoowe 14 Oktoobar 2014 ee ku aadanaa cabashooyinka Dastuurka ayna ka wada hadlaan Guddiga Baarlamaanka ee la-socodka, Dib u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka iyo Golaha Wakiiladda Puntland.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM